

FAAFIN
الرسـمـيـة



RASMI AH
الجـرـيدـة

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهـوريـة الصـومـال الـديـمـقـراـطـيـة

Sannadka 3aad

Mogadiscio, 25 Majio 1975

L. 1, R. 5

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA**جريدة شـهـرـية**

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qlimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku **waxaa** la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN**BOGGA KOWAAD****KOOBNIIN**

SHARCI L. 36, Tr. 30 Abbril 1975 — *Sharci ku saabsan Afduubidda.*

Bog. 413

BOGGA LABAAD**XEER**

XEER MADAXWEYNAYA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 30 Abbril 1975, L. 71 — *Xeerfaafin ku saab-
san Sharci Kaydka Boostada.* » 415

XEER MADAXWEYNAYA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 30 Abbril 1975, L. 71 — *Postal Savings
Regulation.* » 430

XEER MADAXWEYNAYA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 8 Majio 1975, L. 72 — *Magacaabid Guddi
Degmooyin.* » 443

- XEER MADAXWEYNAHA GOLAH A SARE EE KA-
CAANKA, 11 Majio 1975, L. 73 — *Magacaabid Guddi-*
yada Kacuanka ee Gobolka Mudug. Bog. 447
- XEER WASAARADDA GANACSIGA, 19 Febbrayo 1975,
L. 74 — *Wakaaladda Ganacsiga Ummadda Toos uga*
iibin karto Dadweqnaha. » 450
-

BOGGA SADDEXAAD

TALCOYIN ISGAARSIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

- SHARIKADDA A.M.E.C.O. S.p.A., Tr. 18-5-1973 — *Isui-*
maatin Guudnimo oo Caadi ah. (76) Bog. 451
- NUCLEARE SOMALA S.p.A. Tr. 22 Majio 1975 — *Oggo-*
laashada Misaaniyadda Sannadka 1974. (77) » 451
- MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Tr. 19-5-1975 —
Jeeg woreegto ah, L. 12237, Shs. 750 uu leeyohay
Cuma: Cali Xaaji Saciid. (78) » 455
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 22-5-1975
— *Lumidda Buugga Lacagta L. 1.829, Shs. 1.554, ay*
wakiil Sharci ka tahay Khadiijo Bile Hande. (79) » 456
-

BOGGA KOBNIIN SHARCI

SHARCI L. 36, Tr. 30 Abril 1975.
Sharci ku saabsan Afduubidda.

GUDDOONSHAHAA GOLAHA SAREE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY In tahay lagama maarmaan in la soo saaro Sharci
ku saabsan Afduubidda;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xcghayaha Daw-
ladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta,

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo
kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Afduubid

1. Qof kasta oo ku afduuba Waddanka gudihiisa ama dibeddaba qof, dayuurad ama gaadiid kale isagoo doo naya in la siiyo lacag ama xoolo ama uu siyaasad haan uga faa'iideysto taaso ka soo horjeedaa maslaxadda guud ee Qaranka Soomaaliyeed, nabadgeelyada iyo siyaasadda Kacaanka Soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabyaa dil.

2. Dadka kale ee ku lug leh dembigaas abaabulkiisa ayagana waa
xaa lagu ciqaabyaa sida lagu sheegay qaybta 1aad ee qodcbkaan.

Qodobka 2aad

Ka reebid

Dhaqan gelid

Haddii dembigaas uusan ka soo horjeedin danaba guud, xurriyadda, midnimada iyo siyaasadda guud ee Qaranka, Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayasha Dawladda ayaa go'aan ka gaadhi doona wixii laga yeeli labaa dadkii galay dembigaas.

Qodobka 3aad
Demb i qarin

Qof kasta oo ka war hela abaabulka dembiga lagu sheegay qodobka 1aad oo aan soo ogeysiin Ciidamada Nabadgeliyada ee ku shuqul leh, waa xaa lagu ciqaabaya xarig 20 sano ilaa 30 sano, wixii hanti ah ee u lee-yahayna Dawladda la wareegeysa.

Qodobka 4aad
Demb i dhaafid

Qof kasta oo ka qayb gala abaabulka dembigaas haddii uu soo sheego intii uusan dambigu dhicin, wax dembi ah ee lagu qaadayo ma jiro.

Qodobka 5aad
La wareegid

Wax allaale wixii ey weydiisteen oo ey heleen dadka galay dembiga lagu caddeeyey qodobka 1aad wixii hanti ah oo ey ku leeyihii Waddanka gudihiiisa ama dibeddaba waxaa la wareegeya Dawladda Soomaaliyeed.

Qodobka 6aad
Awood

Maxkamadda Badbaadada Ummadda ayaa awood u leh inay qaado dembiga lagu caddeeyey Sharcigaan.

Qodobka 7aad
Qaadista dacwadda

Qofka ku xadgudba Sharciga waxaa dacwad lagu qaadi karaa isagoo maqan.

Qodobka 8aad
Tirtir

Waxaa la tirtiray qodobka 486 ee Xeerka Ciqaabta.

Qodobka 9aad
Dhaqan gelid

Sharcigaan si degdeg ah buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Abril 1975.

MADAXWEYNNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

BOGGA LABAAD XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 30 Abril 1975, L. 71.

Xeerfaafin ku saabsan Sharciga Kaydka Boostada.

GUDDOONSHAHAA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in la sameeyo xeerfaafin oo fasir iyo faahfaahin ka bixinayo sharciga kaydka boostada;

ISAGOO ARKAY Qodobka 37 ee Sharciga Iam. 17 taariikhdiisu yahay 21ka Jannaayo 1975, Sharciga Kaydka Boostada;

ISAGOO TIXGELINAYA Soo jeedinta Xoghayaha Dawladda ee Boostada iyo Isgaarsiinta;

WUXUU XEEREEYEY

Qodobka 1aad

Oggolaanshaha Xeerfaafinta Kaydka Boostada

Waa la oggolaaday xeerfaafinta halkan ku lifaaqan oo ahaanaya qabyka mid ah xeerkakan.

Qodobka 2aad

Hirgelin

Xeerkani wuxuu dhaqan gelaya kaddib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Abril 1975.

GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Aabduullaahi Cosoble Siyaad

XEERFAAFINTA KAYDKA BOOSTDA

Qaybta I.

AWAAMIR GUUD

Qodobka 1aad

Dhameyn (Definition)

Xeerfaafintaan erayga «SHARCIGA» waxaa loola jeedaa sharciga Kaydka Boostada (Sharci lam. 17 ee 21-1-1975) haddaanan wax kale loola jeedin, ereyda kale oo dhan, waa isku micna sida sharciga ku qoran.

Qodobka 2aad

Buugagga Kaydsiga

1. Buugagga Kaydsiga magacaaban waxaa lagu qori karaa qof ka sta xataa hadduusan qaan-gaar ahayn, hey'adaha iyo shirkadaha gaar ahaaneed.

2. Buugagga kaydsiga waxay ka kooban yihii: buugag oo lamba rada isdabajoogga ah madbacadda laga soo daabacay. Buugaagtaas waxay ka sameysan yihii, jildi adag, laba baal qoridda magaca (Midkood loo diraya xarunta dhexe ee Kaydka Boostada), baalal lagu qorayo xisaab-falyo iyo rasiido lacag lagu qaadanayo.

3. Baalasha oo dhan waa inay ku qornaadaan lambar isdabajoogga ah iyo lambarka buugga kaydsiga.

4. Nooca buugga kaydsiga iyo qaabkiisa waxaa lagu soo saarayaa Dekreeto ee Xoghayaha.

Qodobka 3aad

Xisaabta lagu qorayo Buugagga Kaydsiga

1. Qoritaanka Buugagga kaysiga waxaa ku qori karayaa oo keliya qofka uu u fasaxay Madaxda Kaydka Boostada. Qoritaankaas waa in lagu caddeeyaa saxiixa karaaniga iyo shaabbadda xafiiska ee taariikhda leh.

2. Xisaabta ku qoran rajistrada xafiiska soo saaridda iyo Xarunta Dhexe ee Kaydka Boostada waa inay isu waafaqaan sida ku qoran Buugga Kaydsiga.

3. Qoritaanka buugga kaydsiga lama masaxi karo, haddii aysan qalad ahayn amba beddelaadda cinwaanka qofka buugga leh loo baahan. Haddii saxidda loo baahdo waxa sameyn kara oo keliya xafiiska buugga kaydsiga soo saaray, qoritaanka la masaxayo waa inuu ahaado mid la arki karo oo uu la socdo saxiixa karaaniga ku hawl leh iyo shaabbadda xafiiska.

Qodobka 4aad

Baab'iinta warqadaha (records)

1. Kaydka Boostada waa baabi'in karaa dokumentooyinka ku saabsan hawlaha kaydsiga markii la dhaafo muddada hoos ku qoran:
 - a) Toban sano dokumentooyinka ku saabsan xisaabta la xidhay;
 - b) Shan sano dokumentooyinka oo kale.
2. Muddadaas waxay ka bilaabataa, maalinta u horeysa sannadka ku xiga kaa xisaabta la xidhay amba dokumentooyinka la soo saaray.
3. Dokumentooyinka lama baabi'in karoo haddii ay jirto weydiin amba dacwo sharci ah, oo weli aan la dhameyn oo arrintaas ku saabsan.

Qaybta II.

SOCODSIINTA XISAABTA KAYDSIGA

Qodobka 5aad

Furitaanka xisaabta

1. Furidda xisaabta kaydsiga waxaa dalban kara qofka xisaabta loo furaayo amba qof kale ayaa u dalban kara.
2. Xisaabta kaydsiga waa in lagu furaa magacaa buuxa ee qofka xisaabta furanaya.
3. Xisaabta kaydsiga oo wakaalad ku qoran, waa in lagu qoraa magaca iyo jagada qofka oo meesha sharci ahaan wakii ka ah. Haddii beddel dhaco oo ku saabsan wakiilka, waa in la ogeysiyyaa xafiiska buugga kaydsiga soo saaray.
4. Dadka hay'adaha wakiil ka ah, waa inay muujiyaan xaashi lagu aqoonsado in ay wakiil ka yihiin hey'adaas.
5. Waa reeban tahay in xisaab lagu furo magaca aan jirin.
6. Xisaabta waxaa lagu furi karaa buugga kaydsigana la soo saari kara, keliya marka la sameeyo dhigis ah ugu yaraan sida uu waafqaan yahay Qodobka 11aad cadka 2aad ee xeerkani ku dhisan yahay.

Qodobka 6aad

Soo saaridda buugagga kaydsiga

1. Buugga kaydsiga marka la soo saarayo, waa in lagu qoraa baalka qoridda magaca loogu talagalay sida hoos ku tifaftiran:
 - a) Xafiiska soo saaridda (shaabadda dheer);
 - b) Magaca qofka xisaabta furanayo; markii ay tahay hey'ad, waxaa lagu kordhinaya magaca iyo darajadiisa;
 - c) Cinwaanka qofka xisaabta furanayo;
 - d) Taariikhda iyo meeshuu ku dhashay;
 - e) Saxiixa karaaniga buugga kaydsiga bixinayo;
 - f) Shaabadda lambarka jajab leh (fraction) iyo shaabadda taariikhda.

2. Isla markaa loo furayaa rajistar oo lagu haynayo xafiiska buugga kaydsiga soo saaray, (qaab KB-5) rajistarkaas waxaa lagu qorayaa dhigista ugu horeysa iyo wax alla wixii xisaabfal dambe ah.

3. Nuqulka baalka koovaad ee cinwaanka iyo magaca lagu qorayo, waa in buugga kaydsiga laga jaraa loona soo diraa xafiiska dhexe ee kaydka boostada, halkaasoo looga furi doono rajistar kale (Qaab KB-21) oo isla xisaabtaas lagu qorayo.

Qodobka 7aad

Dhigista iyo bixinta caadiga ah

1. Dhigista iyo qaadista lacagta waxa lagu sameyn karaya xafii-syada boostada oo dhan ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ka furan, kuwaasoo u fasaxay Xoghayaha Dawladda Boosaha iyo Isgaarsiinta in hawsha kaydka boostada ay soo maamulaan. Waase in aad buugga kaydkana tustaa wixii kale ee lagaa rabana buuxisaa.

2. Xisaabfalyada la sameeyo waa in lagu qoraa buugga kaydsiga meesha loogu talagalay iyo rajistarada la xidhiidha. In lacag la dhigtagt amba dib loo qaatay, waa in lagu kordhiyaa amba laga jaraa, hadba sida ay tahay, hantidana lagu muujiyaa.

3. Qofka lacagta dhiganaya amba qaadanaya waa inuu hubiyaa in qoraalka buugga kaydsiga iyo foomamka kale ay hagaagsan yihii. Maamulka dhexe ee kaydka bocstada wuu diidi karaa dacwad mar dambe la soo qaadimo.

Qodobka 8aad

Dhigis

1. Dhigista oo dhan waa in lagu soo qoraa ogeysiiska dhigista (bill of deposit) qaab KB-4 oo laga helo xafiisyada boostada, kuwaasoo Blook ahaan loogu dhaqmayo. Blookyadaas oo midab kala gedisan ayaa lagu dhaqmi doonaa, dhigista lagu sameeyo xafiiska soo saaridda (midab cad), xafiisyada kale (midab cas).

2. Ogeysiiska dhigista (bill of deposit) waa in laga dhigaa saddex nuqul oo loogu isticmaalo sida soo socda:

- a) Nuqulka koobaad (bill of deposit) waa in loo diraa xarunta dhexe ee kaydka boostada;
 - b) Nuqulka labaad (rasiid) waa in la soo siiyaa dhigtaha;
 - c) Nuqulka saddexaad (counterfoil) waa inuu Bolooka ku haraa.
3. Saddexda nuqul isku qoraal bay tusaaleynayaan; kaas oo ah:
- a) Lambarka buugga kaydsiga;
 - b) Xafaaska soo saaridda;
 - c) Magaca qofka xisaabta leh;
 - d) Lacagta la dhigtey iyo hantida cusub;
 - e) Taariikhda dhigista;
 - f) Saxiixa karaaniga;
 - g) Shaabadda lambarka jab jab leh (fraction) iyo tan taariikhda.

Qodobka 9aad

Bixinta

1. Lacagta waxaa lagu qaadan karaa rasiidada buugga kaydsiga ku lifaaqan.

2. Rasiidadaas waa inay lahaadaan lambarka buugga kaydsiga. Haddana waa inay u lambarsanaadaan si isdabajoog ah, waxaanna waajib ah in loogu isticmaalo sida lambarada isu xigaan. Markii rasiid la baabi'in rabo sabab kasta ha ahaatee, waa in lagu daayo ha ku lifaaqnaado buugga kaydsiga.

3. Rasiidada waa laba nooc, kuwa midabka caddaan leh waxaa lagu dhaqmaya marka lacagta laga qaadanayo xafiiska buugga kaydsiga soo saaray, kuwa kale oo midabka cas ku daabacan, waxaa loogu dhaqmaya xafiisyada kale.

4. Rasiidada waa inay ku qorntaadaan:

- a) Xafiiska bixiyaha;
- b) Lacagta dib loo qaataay iyo hantida cusub;
- c) Saxiixa qaataha;
- d) Saxiixa karaaniga;
- e) Shaabadda lambarka jajab leh iyo tan taariikhda.

Rasiidada oo midabkooda casaan ku daabacan yahay waa inay siyaado ku qorntaadaan «Xafiiska soo saaridda».

5. Lacagta waxaa qaadan kara oo keliya, qofka xisaabta iska leh, amba qofka asagu soo wakiishay, markii ay soo muujiyaan xaashida aqoonsiga. Wakiilka oo aan buugga kaydsiga ku qorneyn, waxaa looga baahan yahay (xaashida wakaaladda) (Proxy).

6. Ka hor inta aan lacagta la bixinin, xafiiska bixiyaha waa inuu baaraa; in hantida buugga kaydsiga ku qorani ay waafaqsan tahay hantida ku qoran rajistarka Qaab KB-5.

Qodobka 10

Bixinta lacag buug la'aan

1. Ayadoo ka baxsan qodobka 7aad cadka 1aad dhigtaa wuu weydiisan karaa lacag qaadasho, in kastoo buugga kaydsiga Maamulka kadyka boostadu ka haystoo, sabab kasta awgeed.

2. Haseyeeshee, bixinta waxaa sameyn karaya xafiska soo saaridda oo keliya ilaa laba saddexaan 2/3 ee hantida oo ka muuqda rasiidka dhigtaa la soo siiyey marka buugga kaydsiga laga qaatay.

3. Haddii arrintu sidaas ay tahay, dhigtaa waa inuu muujiyaan rasiidka Qaab KB-17 isla markaana ku qoraa weydiinta lacag qaadashada gaarka ah Qaab KB-18 oo lagu heyn doono khasnadda xafiiska buugga

4. Ka dib markii lacagta la bixiyey, xafiiska buugga soo saaray waa inuu la haraa arjiga Qaab KB-18 ilaa buugga kaydsiga la soo celiyo. Dabadeed wixii muhiin ah buugga kaydsiga aaya lagu qori doonaa iyo rajistarka la xiriira xarunta dhexe ee kaydka waa in lagu ogeysiyyaa xaa-shida lacag bixinta sida caadiga ah.

Qodobka 11aad

*Xisaabfalyo lagu sameeyey xafiis aan ahayn
kan buugga kaydsiga soo saaray*

1. Inta aan waxba la bixinin xafiiska bixiyaha ah, waa inuu si deg-deg ah soo weydiyyaa hubaal hantida buugga kaydsiga ku qoran, xafiiska buugga soo saaray amba xarunta dhexe ee kaydka. Iyadoo ka baxsan xeerfaafintan xafiiska bixiyaha ahi wuxuu kari karaa in aanu weydiin dirin haddii lacagtu ay dhan tahay Sh. So. 200 iyo wixii ka yar.

2. Haddii lacag la dhigto amba laga qaado xafiis aan ahayn kan buugga kaydsiga soo saaray, xafiiska xisaabfalka soo sameeyey, waa inuu ku ogeysiyyaa xafiiska soo saaray buugga kaydsiga, xaashi gaar ah oo loogu tala-galay (Qaab KB-19).

3. Ogeysiiska dhigista amba xaashida lacag bixinta oo midab cas ku daabacan, waa in loo soo diraa Xarunta dhexe ee kaydka boostada sida caadiga ah.

Qodobka 12aad

Xiridda xisaabta

1. Ka dib marka hantida idil dib loo qaado, dhigtaha wuu wey-diisan kara in xisaabtiisa uu xirto. Markii sidaas ay tahay, buugga kaydsiga waa in laga qaadaa iyadoo la siinayo rasiid (Qaab KB-17) waxaanna ka qaadaya xafiiska oo u diraya Xarunta Dhexe ee Kaydka Boostada, si loo xisaabiyoo dulsaarka u kordhay oon weli la siinin.

2. Dulsaarkaas bixintisu waxaa sameynayaa sida caadiga ah xafiiska ku shaqa leh, kaddib markuu maamulka dhexe ee kaydka ku qoro buugga kaydsiga.

Qodobka 13aad

Xadka ku saabsan dhigista iyo qaadashada

1. Bixinta waxaa lagu sameynayaa xafiisyada boostada waqtiga la weydiisto, haddii lacag kifaaya ah waqtigaas aynan jirin mooyee amba haddii wiswis ka yimid xagga habsamida xisaabfalyada. Markay sidaas tahay, lacagta waxaa la bixinayaa mar alla markii lacag la helo, amba caddeyn laga helo hadba sida arrintu ay tahay.

2. Dhigista amba qaadashada kama yaraan karto 10/- (toban) shilin, xadkaas laguma dhaqayyo marka xisaabta la xidhayo, sida ku qoran qodobka 11aad cadka 2aad.

Qodobka 14aad

Ku qoridda dulsarka

1. Dulsarka ka dhashay dhigista, waxaa xisaabinaya Maamulka Dhexe ee Kaydka Boostada, wuxuu u dirayaan xafiis walba oo buugagga kaydsiga soo saaray, liis gaar ah.
2. Xafiiska soo saaridda, mar alla markii uu helo liiskaasi, dulsarka wuxuu ku qorayaan rajistarada xisaabaha (Qaab KB-5), isagoo ku kordhinayo hantidii hore.
3. Dulsaarka waxaa buugga kaydsiga lagu qorayaan, hantidii horena lagu kordhinayaan, mar alla markii buugga kaydsiga la keeno.

Qodobka 15aad

Cusbooneysiin

1. Haddii aan buugga kaydsiga lagu dhaqmi karin, maxaa yeelay wuu hallaabay amba baalasha xisaabta lagu qcro amba xaashiyaha lacagta lagu qaado ay dhammadeen, waxaa laga cusbooneisiinayaan xafiiska boostada buugga soo saaray.
2. Sidaas awgeed xafiiska ceynkaas ah, marka uu hubiyo in hantida buugga kaydsiga ku qoran ay waafagsan tahay rajistarka xisaabta (Qaab KB-5) wuxuu soo saarayaan buug cusub sida caadiga ah wuxuuna ku guurinayaan hantida midka duugga ku qornaa. Buugga kaysiga cusub iyo rajistarka (Qaab KB-5) waxaa lagu muujinayaan lambarka buugga duugga ah iyo labada dhinacba (viceversa).
3. Buugga kaydsiga oo duugga ah, waxaa loo dirayaan xarunta dhexe ee kaydka boostada.

Qodobka 16aad

Naqal (duplication)

1. Marka buugga kaydsiga uu lomo, la xado amba uu baaba'o, naqalka waxaa soo saari karaan xafiiska soo saaridda asagoo ammar ka heelay xarunta dhexe ee kaydka boostada.
2. Arjiga naqalka lagu weydiisanayo waxa saxiixayaa qofka xisaabta leh amba wakiilkiisa. Haddii xisaabtu dad badan u dhaxeysa, giddigood waa inay saxiixaan xataa haddii ay awood ay u leeyihiin inay soo qaadan karaan lacagta sida uu dhigayo qodobka 26aad ee sharciga.
3. Wixii naqal ah wuxuu yeelanayaan kharash sida uu qorayo Tacriifka Boostada. Tigidhada kharashka khuseynayana waxa lagu dhejinaaya arjiga, waana la shaabadeynayaan (cancelled).
4. Inta aan naqalka la oggolaanin, Maamulka dhexe ee kaydka, wuxuu ogeysiis u dirayaan xafiiska buugga soo saaray, haddii ay lagaama

maarmaan noqotona, weliba wuxuu ogeysiin karaa xafiisyada kale. Isla ogeysiiskaas dadweynaha waxaa loo sheegayaa haddii marka bili dhammaato ay wax dacwad ahi ka imaan weydo waxaa la bixin doonaa buug cusub oo naqal ah.

5. Muddadaa dhexdeeda haddii dacwad ka timaado, maamulka dhexe ee kaydku xannibayaa bixinta naqal, ilaa inta ay heshiinayaan amba ay helayaan go'aan maxkammadeed labada qolo ee isku horjeeda.

Qodobka 17aad

Habka naqalka loo bixinayo

1. Marka ay dhammaato muddada uu shegayo qodobka hore ee la soo dhaafay, xafiiska ku lug leh ayaa dib u soo dirayaa ogeysiiskii laga soo sameeyey Maamulka Dhexe ee Kaydka. Wuxuu ku soo muujinayaan ogeysaaska in dacwad laga qabo iyo in kale.

2. Markuu Maamulka Dhexe ee Kaydka xaqijiyo inay xaashiyaha oo dhan sida la rabay yihii, ayuu awood siinaya xafiiska buugga soo saaray inuu bixiyo buug cusub oo naqal ah. Hantidii u tiilay isla markiiba waxaa caddeynaya Maamulka Dhexe ee Kaydka.

3. Helitaanka awoodda kabaci xafiisku wuxuu bixinayaa buug kaydsi cusub isagoo raacaya qodobka 14aad cadka labaad ee xeerfaafintan.

4. Xafiiska soo saaridda buugga kaydsiga, wuxuu u sheegayaa xarunta dhexe ee kaydka naqalkii iyo shaqadii ku saabsanayd, wuxuuna u soo celinayaa naqalkii awoodda lagu siiyey.

Qodobka 18aad

Diidmo, qabsasho iyo wareejin

1. Wixii diidmo ah amba wixii ammar ah ee ku saabsan qabsasho amba wareejis ka timid maxkamadda, waxay dhaqan galeysaa markii xafiiska soo saaridda uu qoraal ku helo, taasoo markiiba uu gelin doono rajistarka ku saabsan (Qaab KB-5) una soo sheegi doono Xarunta Dhexe ee Kaydka.

2. Dacwad kasta oo la soo sameeyo, wuu la noqon karaa qofkii soosameeyey amba waxaa lagula noqon karaa amar ay bixisay maxkamaddu.

Qodobka 19aad

Xannibaad (Restrictions)

1. Xadadka uu sheegayo qodobka 32aad ee sharcigakan waxaa lagu dhaqmayaan marka la bixinayo buugga kaydsiga. Magaca qofkii buugga leh kaddib waxaa la qorayaan oraahda hoos ku qoran, hadba tii khuseyneysa:

- a) Qaan-gaar ahayn;
- b) Qofka aan xiskiisu dhameyn;
- c) Dhigaalka curaarka ah oo hay'aduhu leeyihiin.

Oraahdan oo kale waxaa weliba lagu qori karaa ogeysiiska digista iyo rajistarka ku saabsan (Qaab KB-5).

2. Haddii arrintu ay ku saabsan tahay qof aan xiskiisu dhameyn, xannibaad laguma xiri karo ilaa amar laga helo maxkamadda sharciga ah.

Qodobka 20aad

Lacag qaadashada la xiriira buugga kaydsiga

1. Wixii lacag qaadasha ah ee ku saabsan buugga kaydsiga, oo lagu xannibay qofka oo aan qaan-gaar ahayn, waxaa lagu sameynayaa amar maxkamadeed oo keliya; haddii aan qofka xisoobta lehi gaarin cimriga ku qoran qodobka 27aad ee sharcigan.

2. Wixii lacag qaadasha ah ku saabsan buugga kaydsiga oo lagu xannibay qofka aan xiskiisu dhameyn, waxaa lagu sameynayaa amar maxkamadeed oo keliya, ilaa xaaladda qofka xisaabta leh laga beddelo maxkamadda sharciga.

3. Wixii lacag qaadasha ah ku saabsan buugga kaydsiga lagu xannibay curaar lacageed, waxaa lagu sameeynayaa oo keliya amar laga heley Hey'adda oo curaarka ku qornaa.

Qodobka 21aad

Lacag bixinta ku saabsan qofka dhintay

1. Lacag bixinta ku saabsan qofka dhintay oo Soomaali ah, lacagtaas waxaa la siinayaa qofka maxkamadda sharciga ku hawl lehi soo magacaabey.

2. Lacag bixinta ku saabsan qofka dhintay ee ajnabi ah, lacagtaas waxaa la siinayaa qofka uu magacaabay Danjiraha amba Qunsulka ka jooga waddanka qofka dhintay jinsiyaddii uu yahay amba amar ka soo baxay maxkamadda sharciga.

Qaybta III.

DHIGISTA MAXKAMADEED IYO DHIGISTA KU

SAABSAN KANJELERIYADA

Qodobka 22aad

Soo saaridda buugagga iyo dhigista

1. Dhigista maxkamadeed iyo dhigista kanjeleriyada waxaa lagu sameynayaa oo keliya xafiisyada uu soo magacaabo Maamulka Dhexe ee Kaydka.

2. Buugag u gaar ah oo si isdabajoog ah u lambareysan xafiis walba ayaa hawahaas lagu qabanayaa. Buugaagaatka waxay ka kooban yihiin: bog oo magaca lagu qorayo iyo bog oo gudaha ah oo lagu qorayo xisaabfalyada.

3. Xisaabta lagu qoray rajistarka xafiiska soo saaridda iyo maa-mulka dhxee ee kaydka waa inay isu waafaqaan taa buugga dhigista ku koran.

4. Ogeysiiska dhigista waa in la qoraa marka buugga la soo saaray iyo dhigista dambeba. Rasiid laga jaray ogeysiiska dhigista waxaa la siinayaa dhigtaha.

5. Buugga lacag lagu kaydsaday, dhigtuhu wuxuu u geynayaa max-kamadda sharciga ee ku shaqo leh.

Qodobka 23aad

Lacag qaadashada

1. Wixii lacag qaadasha ah oo laga qaadayo dhigista maxkamadeed iyo dhigista kanjeleriyada, waxaa lagu sameynayaa oo keliya xafiiska boostada oo buugga soo saaray, iyadoo lagu weydiisanayo xaashi lacag qaadasha ah (warrant) laga soo saaray maxkamadda sharciga ee ku hawl leh. Xaashidaas warrantka ah waxaa lacag lagu qaadi karaa muddo 3 bilood laga bilaabo bisha xaashida la soo saaaray. Markii muddadaas dhammaado, xaasida warrant waa la soo cusbooneysiin karaa sida mud-dadii hore waqtii kasta, waxaanna sameyn karaa maxkamadda sharciga ee ku hawl leh.

2. Qaabka xaashida (warrant) waxay ka kooban tahay afar qay-bood:

- Haraga waxaa la harayaa xafiiska soo saaridda ee maxkamadda sharciga ah;
- Ogeysiis la siinayo qofka xisaabta leh;
- Qaybta caddeynta (controll) maxkamadda sharciga waxay u direysa xafiiska boostada buugga soo saaray, si uu isu hordhigo xaashida kale (warrant);
- Xaashida (warrant) waxaa boostada geynayaa qofka u xaq leh lacagta qaadashadeeda.

3. Wixii xaashi lacag qaadasha ah (warrant) maxkamadda sharciga waxay ku qoreysaa buugga lacagta lagu kaydsaday oo ay haysato.

Qodobka 24aad

Dhaqan gelidda qaynuunka ku saabsan buugagga kaydsiga

Haddii aynaan jirin qoraal ka duwan qaybtan, qaynuunka ku saabsan buugagga kaydsiga waa fidsan yahay, waxaanna lagu dhaqi karaa hawsha dhigista maxkamadeed iyo dhigista ka timid lacagta kanjeleriyada.

Qaybta IV:

BOONOOYINKA BOOSTADA OO DULSAARKA DHALAYAAN

Qodobka 25aad

Midabka iyo noocqada boonooyinka kaydka boostada

1. Boonooyinka kaydka boostada qof kale laguma wareejin karo, waxaana loo soo saarayaan qof kasta oo caadi ah xataa hadduusan qaan gaar ahayn, iyo hay'adaha dawladda iyo shirkadaha gaarka ah. Boonoo-yinka waxaa lagu soo saarayaan: Sh. So. 50, 100, 500, iyo 1000, waxaanna Jaysku xirayaan buug oo ka kooban toban boono.

2. Boonooyinka kaydka boostada waxay ka kooban yihiin laba qaybood oo si isdabajoog ah u lambareysan, boono iyo hubaalkiisa. Calaa-madaha kale ee boonooyinka kaydka boostada waxaa lagu xiri karaa had-dii Xoghayuhu dekreeto soo saaro.

3. Boonooyinka kaydka boostada waxaa lagu daabici doonaa xaraf weyn oo micneynaysa seeriyaalkooda. Soo saaridda cusub, waxaa la soo saarayaan haddii qiimaha dulsaarka isbeddelo.

Qodobka 26aad

Rajistarada boonooyinka kaydka boostada

Labadaba, xafiiska soo saaridda iyo xafiiska maamulka dhexe ee kaydka waxay ku qori doonaan marka boonooyinka la soo saaro iyo mar-ka la bixiyo hadba sida u kala baxayaan.

Qodobka 27aad

Soo saaridda boonooyinka kaydka boostada

1. Xafiiska la weydiyey inuu boono kaydka boostada soo saaro, wuxuu boonada qori doonaan marka la bixiyo lacagta qiimaha boonada, wuu saxiixayaa wuxuuna ku dhufanayaa shaabadda taariikhda leh, laba-da qaybood ee boonada horeysa ka kooban tahay. Shaabadda lambarka jajab-ka leh waa lagu kordhin doonaa. Isla waqtigaas, xafiiska soo saaridda wuxuu ku soo qori doonaan rajistarka laga xusay qodobka hore, magaca iyo cinwaanka dhigtaha, taariikhda kaydka la sameeyey iyo wax alla wixii loo baahan yahay.

2. Kaddib marka hawsha kor ku qoran la sameeyo, xafiiska soo saaridda, wuxuu dhigtaha siin doonaan boonada, qaybeedi labaadna wuxuu u diri doonaan maamulka dhexe ee kaydka oo uu ku qori doono rajistar loogu talagalay.

Qodobka 28aad

Bixinta boonoooyinka kaydka boostada

1. Boonada kaydka boostada, waxaa lagu bixin karaa xafiiska soo saaridda oo keliya, marka uu isla barbar-dhigo diiwaanka ku qoran.
2. Bixintaanka kaddib iyo marka lagu qoro diiwaanka loogu talagalay, xafiiska bixiyaha wuxuu xarunta dhexe ee kaydka u dirayaan boonada la qabtay oo lagu qori doono rajistar la mid ah.
3. Bixin kasta oo ku saabsan boonada kaydka boostada la soo cusbooneysiyyey (duplicated) waxaa waajib ah in marka u horeysa hubaal laga helo xafiiska dhexe ee kaydka.

Qodobka 29aad

Naqalka boonoooyinka kaydka boostada

1. Haddii boonada kaydka boostada lunto, la xado amba ay baabado naqalkiisa ayaa la soo saari karaa.
2. Boonooyinka kaydka boostada aan lagu dhaqmi karin; kuwa halaabeen, ogeysiis la'aan ayaa naqalkiisa la sameyn karaa, laakinse waa sharad ah in seeriaalkiisu (series) iyo lambarka isdabajoogga ah la arki karo.
3. Naqalka boonada kaydka boostada, waxaa ka kooban yahay: boonada laga soo saaray kaydka boostada oo isku qiima ah iyo nooca asliga ah. Boonadaas waa inay ka muuqato iyadoo lagu daabacay casaan erayga (naqal), lambarka jabjab iyo kan isdabajoog ah, magaca dhigtaa iyo taariikhda midda asalka la soo saaray, gacan ayaa lagu qorayaa. Waa kale lagu qorayaa taariikhda naqalka la soo saaray, saxiixa kormeeraha iyo shaabadda rasmiga ah ee kaydka boostada.

Qodobka 30aad

Dhaqan-gelidda qaynuunka ku saabsan buugagga kaydsiga

Haddii aynaan jirin qoraal ka duwan qaybtani, qaynuunka ku saabsan buugagga kaydsiga wuxuu noqonayaa mid fidsan yahay. Wawaanna lagu dhaqi karaa boonoooyinka kaydka boostada.

Qaybta V.

AWAAMIR KU SAABSAN XISAABAHA IYO LACAGAHA

Qodobka 31aad

*Kala qaadidda xisaabta u dhexeysa maamulka
boostada iyo kaydka boostada*

1. Tobankii maalmoodba madaxda xisaabaha boostada wuxuu u dirayaan kormeeraha liisaska dhigista iyo bixitaanka, wuxuuna raacsii-nayaa dokumentooyinka la xiriira hawlahaa kaydka.

2. Xisaab caddeyn ayaa lagu lifaaqi doonaa liisaska cadka hore lagu xusay, laguna muujinaya HANTI iyo QAAN u dhexeysha maamulka boostada iyo kaydka boostada.

3. Haddii lacagtu la dhigtay ay ka badan tahay lacagta la qaataj, jeeg oo dheeraad ah ayaa xisaab caddeyntaas lagu xiri doonaa.

4. Haddii lacagtu la qaataj ay ka badan tahay lacagta la dhigtay, kormeeraha wuxuu maamulka boostada siin doonaa jeeg ku saabsan dheeraadka la bixiyey. Jeegaas waxaa saxiixi doonaa kormeeraha iyo kormeere ku xigeenka.

Qodobka 32aad

Cuskashada qoraalka Ingiriiska

Haddii ay is khilaafaan qoraalka Ingiriiska iyo wixii qoraal ah kale ee ku saabsan «Xeerfaafintan» midka hore ayaa la cusanayaa.

Qodobka 33aad

Beddelaad

Waa la buriyey wixii amaro ah oo ka horjeeda amase aan waafaqsaneyn Xeerfaafintan.

TUSMO

Qaybta Iaad.

AWAAMIR GUUD

| | | |
|---------|------|---|
| Qodobka | 1aad | Dhameyn (definition). |
| » | 2aad | Buugagga kaydsiga. |
| » | 3aad | Xisaabta lagu qorayo buugagga kaydsiga. |
| » | 4aad | Baab'iinta warqadaha (records). |

Qaybta IIaad

SOCODSIINTA XISAABTA KAYDSIGA

| | | |
|---------|-------|--|
| Qodobka | 5aad | Furistaanka xisaabta. |
| » | 6aad | Soo saaridda buugagga kaydsiga. |
| » | 7aad | Dhigista iyo bixinta caadiga ah. |
| » | 8aad | Dhigis. |
| » | 9aad | Bixinta. |
| » | 10aad | Bixinta lacag buug la'aan. |
| » | 11aad | Xisaabfalyo lagu sameeyey xafiis aan ahayn kan buugga kaydsiga soo saaray. |
| » | 12aad | Xiridda xisaabta. |
| » | 13aad | Xadka ku saabsan dhigista iyo qaadashada. |
| » | 14aad | Ku qoridda dulsaarka. |
| » | 15aad | Cusbooneysiin. |
| » | 16aad | Naqal (duplication). |
| » | 17aad | Habka naqalka loo bixinayo. |
| » | 18aad | Diidmo, qabsasho iyo wareejin. |
| » | 19aad | Xannibaad (restrictions). |
| » | 20aad | Lacag qaadashada la xiriira buugga kaydsiga. |
| » | 21aad | Lacag bixinta ku siibsan qofka dhintay. |

Qaybta IIIaad

DHIGISTA MAXKAMADEED IYO DHIGISTA
KU SAABSAN KANJELERIYADA

| | | |
|---------|-------|--|
| Qodobka | 22aad | Soo saaridda buugagga iyo dhigista. |
| » | 23aad | Lacag qaadashada. |
| » | 24aad | Dhaqan gelidda qaynuunka ku saabsan buugagga kaydsiga. |

Qaybta IVaad

BOONOOYINKA BOOSTADA OO DULSAARKA DHALAYAAN

- Qodobka 25aad Midabka iyo noocyada boonooyinka kaydka boostada.
» 26aad Rajistarada boonooyinka kaydka boostada.
» 27aad Soo saaridda boonooyinka kaydka boostada.
» 28aad Bixinta boonooyinka kaydka boostada.
» 29aad Naqalka boonooyinka kaydka boostada.
» 30aad Dhaqan-gelidda qaynuunka ku saabsan buugagga
kaydsiga.

Qaybta V aad

AWAAMIR KU SAABSAN XISAABAHA IYO LACAGAHA

- Qodobka 31aad Kala qaadidda xisaabta u dhexeysa maamulka boostada iyo kaydka boostada.
» 32aad Cuskashada qoraalka Ingiriiska.
» 33aad Beddelaad.
-

XEER MADAXWEYNHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 30 Abril 1975, L. 71.
Postal Savings Regulation.

THE PRESIDENT
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The First and the Second Charters of the Revolution of 21st October, 1969;

HAVING SEEN The necessity of issuing Regulations for proper implementation of the Postal Savings Law;

HAVING SEEN Article 37 of the Law n. 17 of 21st January, 1975, concerning Postal Savings Law;

HAVING CONSIDERED The proposal of the Secretary of State for Posts and Telecommunications;

DECREES:

Article 1

Approval of Postal Savings Regulations

The Postal Savings Regulations which are annexed hereto are hereby approved and shall form an integral part of this Decree.

Article 2

Coming into force

This Decree shall come into force on the date following its publication in the Official Bulletin.

Mogadishu, 30 April 1975.

THE PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council
Major Gen. Mahamed Siad Barre

SECRETARY OF STATE
for Posts and Telecommunications
Dr. Abdullahi Ossoble Siad

POSTAL SAVINGS REGULATION

GENERAL PROVISIONS

Chapter I.

Article 1

Definitions

In these Regulations the expression «THE LAW» means the Postal Savings Law (Law No. 17 of 21-1-1975) and, unless the context otherwise requires, other expressions shall have the same meaning as is ascribed to them in the Law.

Article 2

Savings books

1. Savings books shall be instruments entered in favour of any natural person, even if minor, and public or private establishments.
2. Savings books shall consist of booklets progressively numbered by print. Such books shall be composed of cover, title page in double, (duplicate to be used to inform the Postal Savings Centre), pages for entries and coupons for withdrawals.
3. All pages shall be progressively numbered and bear the number of the saving book.
4. The shape and characteristic of savings books shall be fixed by decree of the Secretary.

Article 3

Savings books entries

1. Entries in savings books shall be made only by authorised officers. They must be certified by his signature and an imprint of the date stamp.
2. All entries made in the registers kept with the issuing office and the Postal Savings Centre, must correspond with those in the Savings book.
3. Entries made in savings books shall not be altered, unless in case of error or change in the address of the accounts holder. If a correction is necessary, which shall be made only by the issuing office, the entry to be altered shall be cancelled so as to be legible and the alteration be confirmed by the officer with his paragraph and on imprint of date stamp.

Article 4

Destruction of records

1. The Postal Savings may destroy the records relating to savings services after expiry of the following periods:

- a) Ten years for records relating to accounts which have been closed.
 - b) Five years for any other document.
2. Such periods shall begin from the first day of the year following that in which accounts have been closed or documents issued.
 3. Records shall not be destroyed if there is an inquiry or legal action pending in respect thereof.

Chapter II.

OPERATION OF SAVINGS ACCOUNT

Article 5

Opening of accounts

1. The opening of an account may be requested by the person in whose favour it is to be entered or by a third person.
2. Savings accounts shall be opened in the full name of the accounts holder.
3. A savings account which is entered in favour of a corporation must bear in addition, the indication of the name and the function of its legal representative. If there is a change as far as representative are concerned the issuing office of savings book must be informed.
4. Representative of corporations must proof that they are entitled to act in the name of that body.
5. It shall be prohibited to open an account in a fictitious name.
6. An account shall be opened and savings biik issued only when the minimum deposit according to Art. 11 paragraph 2 of this regulations is made.

Article 6

Issuing of savings books

1. A savings book shall be issued by filling in its title page on which the following details shall be indicated:
 - a) Issuing office;
 - b) Name of the accounts holder, in case of corporation in addition name and title of its representative;
 - c) Address of the accounts holder;
 - d) Day and place of birth;
 - e) Issuing officers signature;
 - f) Fraction seal and date stamp.
2. At the same time an entry shall be opened in a register kept at the issuing office in which the first deposit as well as all following transaction shall be entered.

3. A copy of the title page shall be detached sent to the Postal Savings Center, where a register with the same entries shall be kept.

Article 7

Deposit and withdrawals, common regulations

1. Deposits and withdrawals can be made at all post offices in the Somali Democratic Republic, which are authorized by the Secretary of State for Post and Telecommunications, on production of the Savings book and accomplishment of the respective formalities.

2. Transactions made shall be entered in the savings book in the space intended for this purpose and in the registered accordingly. The amount deposited or withdrawn shall be added or deducted as a case may be and the actual credit shown.

3. Person depositing or withdrawing money shall ensure then selves that the entries in the necessary forms and in the Savings books are correct. The Postal Savings Center may refuse complaints put forward later on.

Article 8

Deposits

1. For all deposits a bill of deposit kept at the post offices in booklets shall be used. Different booklets shall be used deposits at the issuing office (white colour) and other offices (pink colour).

2. The bills of deposits shall be made out in triplicate and used as follows:

- a) First copy (bill of deposit) to be forwarded to the Postal Savings Center;
 - b) Second copy (receipt) to be handed over to the depositer;
 - c) Third copy (counterfoil) to be remained in the booklet;
3. The three copies shall indicate the same entries namely:
- a) Number of the savings book;
 - b) The issuing office;
 - c) The name of the accounts holder;
 - d) The amount deposited and the new credit;
 - e) The date of deposit;
 - f) The signature of the officer;
 - g) Fraction and date stamp.

Article 9

Withdrawals

1. Withdrawals shall be made by means of coupons which are attached to the savings book.

2. Such coupons shall bear the number of the savings book. They shall be progressively numbered and used strictly according the number.

When a coupon is to be cancelled for any reason, it shall be left attached to the relevant savings book.

3. There shall be two series of coupons, one to be used for withdrawals at the issuing office, the other printed in red to be used at other offices.

4. They shall indicate:

- a) The paying office;
- b) The amount withdrawn and the new credit;
- c) The signature of the account holder;
- d) The signature of the officer;
- e) The imprints of fraction and date stamp.

Coupons printed in red shall indicate in addition the issuing office.

